Guddoomiyaha


# FAAFINTA RASMIGA

الجريدة الرسمية

DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 8-aad Garoowe 30 August-2006 Lam. 8

Faafinta bil walba soo baxda

جريدة الشهرية

*Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland*

Qiimuhu waa Sh/So. 10,000 lambar walba Rukunka sanadkii waa Sh/so. 170,000 dalka Gudihiisa, dibadda Sh/so. 500,000 **Rukunka** la weydiisto wakhtiga loo gooyay wuxuu ka bilowday 1-da Janaayo qiimaha Qoritaanka F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh/So. 3,000 **Rukunka** iyo qoritaanka waxaa la weydiistaa qaybta maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha Barriga ee Wasaaradda Maaliyadda.


---

# TUSMADA


**Qaybta kowaad**
**Sharci**

**Qaybta Labaad**
**Xeer**

**Qaybta Saddexaad**

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogeysiis, Iidheh, IWM**
**Waxba ma leh**

Sharci Lr. 3. ee 23/08/2006 kuna saabsan Xeerka Caasimadda Puntland.

DOWLAD G. PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

PUNTLAND STATE
OF SOMALIA

Xafiiska Madaxweynaha

office of the President

XEER LR. 3 EE 23/08/2006 KUNA SAABSAN XEERKA CAASIMADDA PUNTLAND.

Madaxweynuhu

| | |
|---|---|
| Markuu arkay: | Dastuurka DGPL |
| Markuu arkay: | Ansixinta Golaha Wakiiladda ee Xeerka Caasiamda ee Sumad XGGW/DGPL/109/2006 ee 31/07/06. |
| Markuu garowsaday: | Ansixinta Xeerka Caasimadda Puntland. |
| Isagoo horay u dhagaystay: | Ra'yiga Golaha Xukuumadda. |

<u>Wuxuu soo saaray.</u>

Sharcigan soo socda:-

<u>Qodobka 1-aad.</u>

Golaha Wakiiladdu waxay ansixiyeen sida kor ku cad Sharciga Caasimadda Puntland.

<u>Qodobka 2-aad</u>

Nuquladda asalka ah waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, kan garyaqaanka Guud iyo kan Xoghayaha Golaha Wakiiladda.

<u>Qodobka 3-aad</u>

Dhaqan-galka sharcigani wuxuu noqonayaa maalinta 16-aad laga bilaabo Maalintuu sharcigani faafinta Rasmiga ah ee Dawlada ku soo baxay.

Wabilaahi Tawfiiq

Mudane, Maxamuud Muuse Xirsi
Madaxweynaha Dawlada Puntland

Garoowe

# XEERKA CAASIMADDA DGPL

Qodobka 1aad
(Macnayn)

Marka sharciga laga hadlayo ereyada soo socda waxay leeyihiin micnaha mid walba ku hor dhigan:-

1. **Dawladda Hoose :-** waxaa loola jeedaa hay'ad ka dhisan Magaalo madaxda Puntland oo shakhsiyada qaanuuni ah leh, ujeedadeeduna tahay mida ku tilmaaman sharcigaan
2. **Golaha Shacabka ee Deegaanka :-** waxaa loola jeedaa Gole xubnihiisu dadka deegaanku ay soo xusheen inta doorasho laga gaarayo, kana taliya arrimah D/hoose
3. **Guddiga Joogtada ah:-** waxaa loola jeedaa Guddiga xunihiisu ka mid yihiin Golaha shacabka ee deegaanka oo xilkiisa sharcigaani tilmaamayo.
4. **Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee Deegaanka:-** waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee deegaanka & Guddiga joogtada ah, waana ugu sarreeya maamulka D/hoose
5. **Caasimad :-** waxaa loola jeedaa magaalo madaxda DGPL ee Garoowe
6. **Wasaaraddda:-** waxaa loola jeedaa Wasaaradda D/hoose & horumarinta reer miyiga
7. **Wasiir:-** waxaa loola jeedaa Wasiirka wasaaradda D/hoose & horumarinta reer miyiga

## QODOBKA 2-AAD
## (Hab Dhiska Caasimada)

2.1 Marka laga hadlayo sharcigan Garoowe waa caasimada DGPL ee Soomaaliya, isla markaana waa magaalo madaxda Gobolka Nugaal, waxayna u qeybsami kartaa ama yeelan kartaa degmooyin hoos yimaada.

**2.2 Caasimadu waxay u fidi kartaa dhinac walba oo jihooyinka ka mid ah.**

2.3 marka sharcigani dhaqan galo caasimada waxaa loo aqoonsanayaa inay ku dhisan tahay sharcigan.

2.4 Madaxweynaha DGPL isagoo tixgelinaya talo soo jeedinta wasiirka & ogolaanshaha Golaha xukuumada, wuxuu wax ka bedeli karaa qaab dhismeedka caasimada, taasoo laga ansixinayo Golaha Wakiillada.

2.5 Caasimadu waxay yeelan kartaa labo degmo iyo ka badan

2.6 waxaa jiraya dhulkii hore ee dawlada iyo dhul hor leh ee dawlada keyd u noqonaya

## QODOBKA 3-AAD
## (Habka Maamulka Xukunka Caasimadda)

3.1 Maamulka xukunka caasimadu wuxuu ku dhisan yahay habka dimuqraadiga oo ku taagan sharci waafaqsan dastuurka DGPL

3.2 Awooda D/hoose ee caasimadu waa qeyb ka mid ah tan maamulka P/land, waxayna fulisaa hawlaha sharcigani u xil saaray, Siyaasadda, Dhaqaalaha iyo in la dhiso bulsho dimuqraadi ah oo higsanaysa horumar

3.3 Caasimadu waxay yeelanaysaa hab (Town Planning ) oo u gaar ah kana duwan magaalooyinka kale
3.4 Dhamaan bulshadda P/land xuquuqda caasimadda waa u siman tahay
3.5 Si loo sugo nabadgelyada caasimadda DGPL, maadaama ay hay'adihii dawlada iyo ajaanibkiiba joogaan, waa in loo helaa ciidan Boolis ah oo isku dhaf Puntland ah.

**3.6 Waxaa Caasimadda ku sugnaanayaa keydka Ciidamada DGPL oo dhan**

**3.7 Caasimaddu waxay yeelan kartaa Xeer nidaamiye gaar u ah Arrimaha Nabadgelyada, waxaana soo saaraya Guddiga Nabadgelyada, iyagoo tixraacaya xeerkii Nabadgelyada ee hore Golaha Wakiilladu u Ansixiyey**

## QODOBKA 4-AAD
## (Mudada Xilka & Tiradda Golaha Deegaanka)

4.1 D/hoose waxaa maamula xubno lagu doortay habka uu tilmaamayo sharciga doorashadda Golayaasha shacabka ee uu ansixiyey Golaha Wakiillada DGPL
4.2 Xubnaha Golaha Shacabka ee caasimaddu waxa uu ka kooban yahay 25 Xubnood
4.3 Mudada Golaha shacabka ee caasimadda waxay kala mid tahay dhamaan shuruucda kale ee Golayaasha degmooyinka P/land.

## QODOBKA 5-AAD
## (Shakhsiyadda Qaaanuuneed)

5.1 D/hoose ee caasmaddu waa hay'ad qaran oo loo aasaasay horumarka maamulka D/hoose, waxayna leedahay shakhsiyad qaanuuni ah & maamul madax banaan oo ay ku fuliso xilkeeda sharcigu tilmaamayo

## QODOBKA 6-AAD
## (La-tashi)

6.1 Golaha shacabka ee deegaanka iyo Guddiyadooda joogtada ah waxay shirarkooda ugu yeeri karaan aqoon-yahano iyo la taliyayaal, xaga farsamda ah iyo sharciga, kuwaasoo doodaha ka qeyb geli kara hase yeeshee aan lahayn xaq cod

## QODOBKA 7-AAD
## (Astaanta & waajibaadka D/hoose ee Caasimadda)

7.1 (a) D/hoose ee caasimaddu waxay yeelanaysaa astaan ama calaamadd u gaar ah.
(b) Diyaarinta iyo dhaqan gelinta astaanta iyo calaamadda ku xusan faqradda 8.1 (a) ee xeerkan waxaa leh Golaha shacabka deegaanka ee caasimadda.
7.2 Daryeelka caafimaadka guud gaar ahaan nadaafadda magaalada iyo ka hortaga cudurada faafa iyo dhismo musqulo dadweyne
7.3 Asaasida suuqyo cusub badeeco iyo xoolo
7.4 Ogolaansho dhismayaash cusub, kuwa la cusboonaysiinayo iyo kuwa u baahan in la dumiyo
7.5 Wax ka qabashadda iyo gurmadka, masiiboovinka iyo dhibaato kasta oo wax u dhimi

karta bulshadda

7.6 Diyaarinta iyo fulinta mashaariicda lagu hormarinayo bulshadda

7.7 Qorsheynta barnaamijyada horumarineed ee leh wakhti dhow iyo mid fog

7.8 Dhismayaasha dugsiyada aasaasiga ah, xarumada hooyada iyo Dhalaanka, xanaanada caruurta iyo malcaamadaha Quraanka.

7.9 Sameynta iyo dayactirka jidadka dhex mara Caasimadda

7.10 Bilicsamida iyo qurxinta magaalada caasimadda ah

7.11 Tirakoobka & diiwaan gelinta dadweynaha ku nool caasimadda iyo weliba xafidaada diiwaanada dhalashadda, dhimashada, kuurka iyo furniinka.

7.12 Sameynta dhul ama goob lagu aaso meydka

7.13 Sameynta meelo wax lagu akhristo, kobcinta geedaha iyo dhireynta magaalada

7.14 Golaha deegaanka ee caasimadda xil baa ka saaran hawl kasta oo lagu horumarinayo dadweynaha ku nool caasimadda.

## Qodobka 8-aad
## (Dakhliga Caasimaddu Waxa uu ka kooban yahay)

A) Canshuuraadka iyo xuquuqda ku qoran sharciga canshuuraadka iyo wixii kale loogu ogolaado sharci ama xeer dawladeed.

B) Macaashka ay ka heleen adeegyada bulshada

C) Dakhliga ka soo gala deeqda ay ka hesho dawlada dhexe iyo bulshada deegaanka

D) Amaahda ay ka hesho dalka gudihiisa ama dibadiisa

E) **Caasimaddu waxaa looga jarayaa dakhli Miisaaniyada guud ee Dawladda, kaas oo dhan 3% wuxuuna ka bilaabmayaa sanad Miisaaniyadeedka cususb 2007**

## Qodobka 9-aad
## (Dhulka Caasimadda)

9.1 Dhulka caasimadda waxaa iska leh Eebe weyne ka sakow shacabka PL waana loo siman yahay

9.2 waxaana maamulka & bixinta dhulka caasimadda iska leh D/hoose ee caasimadda

9.3 Hab bixinta dhulku wuxuu waafaqsanaanayaa sharciga dhulka ee DGPL

## Qodobka 10-aad
## (Jaangooyada Guud ee Dhulka Magaalo Madaxda Garoowe)

10.1 D/hoose ee Garoowe waxay dhulka magaalo madaxda u sameynaysaa jaangooyo guud oo lagu maajinayo dhulka looga talo galay degsiimada, wershadaha, ganacsiga, danaha caamka ah iyo nabadgelyadda.

10.2 Waxaa kale oo isla jaangooyadaas guud lagu muujinayaa hawlaha adeega ee lagama maarmaanka u ah nolol maalmeedka bulshada sida:- korontaynta, biyo gelinta, isgaarsiinta, bulaacadaha iwm.

10.3 Waxay u sameynaysaa meelaha halbowlaha u ah magaalo madaxda naqshad gaar ah, iyadoo dhulkaas u salaynaysa u hogaansanaanta naqshadaas.

10.4 Jaangooyada guud iyo naqshad gaar ah ee ku xusan qodobkan 10-aad waa in uu ogolaadaa Guddiga joogtada ah ee Golaha shacabka ee caasimadda, ka dib marka uu dhageysto talada Guddiga farsamada

## Qodobka 11-aad
## (Saldhiga Dhul Bixinta)

11.1 Dhul kasta oo la bixinayo wuxuu noqonayaa mid ku salaysan jaangooyada ku xusan qodobka **11-aad** ee xeerkan.
11.2 Dhulka leh isticmaal dhisme rasmi ah, waa in lagu Guddoomiyaa Go'aanka Guddiga joogtada ah ee Golaha shacbiga magaalo madaxda
11.3 Lama bixin karo dhul aan jaangooyada guud ku jirin
11.4 Waxaa ka reeban D/hoose in dhul qof loogala wareegay dan guud qof kale la siiyo

## Qodobka 12-aad
## (Noocyada Loo qaybinayo dhulka)

12.1 Dhulka ay bixiso D/hoose ee Garoowe ee loogu tala galay deegaanka wuxuu u qeybsamaa laba nooc:-

A. Dhul leh isticmaal rasmi ah.
B. Dhul leh isticmaal ku meel gaar ah

12.2 Dhulka leh isticmaalka rasmiga ah wuxuu noqonayaa dhul laga dhisi karo guri ka sameysan daar, laga tixraacayo naqshada uu soo sameysto qofka dhulka la siiyo,
12.3 Dhulka isticmaalka ku meel gaarka ah waxaa laga dhisi karaa guri ka sameysan daar, baraako, cariish, mudul, aqal Soomaali iyo wixii ku dhigma.
12.4 Dhulka leh isticmaal ku meel gaar ah uma baahna in naqshad loo sameeyo, hase yeeshee dhismuhu waa in uu yahay mid waafaqsan jaangooyada guud ee maabka xaafada

## Qodobka 13-aad
## U rogid dhul leh isticmaal ku meel gaar ah & mid leh isticmaal rasmi ah

13.1 Dhulka leh isticmaal ku meel gaar ah waa loo rogi karaa mid leh isticmaal rasmi ah ka dib -

A) Marka qofka leh dhulkaas uu soo weydiisto, isagoo fulinaya shuruudaha dhulka leh isticmaalka rasmiga ah.
B) Dhulkaasna waa in uu ahaadaa mid jaangooyada waafaqsan.

## Qodobka 14-aad
## Bixin Dhul Dhismo

14.1 D/hoose ee Caasimaddu, iyadoo dhowraysa sharcigan iyo shuruucda kael ee u yaal dhismaha, waxay awood u leedahay inay siiso dhul dhismo, hay'adaha dawlada, iskaashatooyinka, shirkadaha, ururada & qof gaar ahaaneed.

14.2 Siimada ku cad lamabrka 1aad ee qodobkan waxay ku xiran tahay in la bixiyo qiimo go'an oo la jaangooyey mitir laba jibaaran.
14.3 Duqa Caasimadda wuxuu awood u leeyahay in uu go'aan sababaysan ku bixiyo, lacag la'aan dhul dhisme oo leh isticmaal ku meel gaar ah.
14.4 Qiimaha halkii mitir oo laba jibaaran ee dhulka dhismaha ah ee leh isticmaal rasmi ah waxaa lagu xadidayaa xeer uu soo saaro Madaxweynaha DGPL, isagoo dhegeystay Wasiirka Wasaaradda D/hoose & HRM, waxaana ansixinaya Golaha Wakiillada dhulka

Kale ee leh isticmaalka gaarka ah waxaa lagu xadidayaa xeer uu soo saaro Wasiirka Wasaaradda D/hoose & HRM, isagoo dhegeystay duqa caasimadda, ka dib markii ay sidaas u gudoonsadaan Guddiga joogtada ah ee Golaha shacabka ee caasimada ah, qiimaha dhulka isticmaalka ku meel gaarka ah kama badnaan karo 50% midka leh isticmaalka rasmiga ah, waxaana loo tixgelinayaa markii dhulkaas loo rogayo isticmaal rasmi ah.

14.5 lacagta ka soo gasha dhul bixinta 100% sharcigani wuxuu u oggolaanayaa inay isticmaasho D/hoose ee Caasimada.

## Qodobka 15-aad
## Habka Qeybinta Dhulka

15.1 Dhulka dhismaha waxaa lagu qeybinayaa hab ku saleysan cadaalad iyo sinaan, iyadoo ujeedadu tahay in muwaadin kasta uu helo meel uu ka dhisto hoygiisa iyo goob ganacsi.

15.2 D/hoose ee Garoowe marka ay qeybinayso dhul degsiimo ah waxay tixgelinaysaa arrimaha soo socda:-

A) In da'da dhulka qofka weydiistay ayan ka yareyn 15 sanno
B) In haddii uu ku leeyahay magaalada caasimadda ah dhul degsiimo ah wuxuu ka dhisan karaa dhismayaal kale.

15.3 Duqa Caasimadda, isagoo tixgelinaya duruufo gaar ah oo la hubiyey, wuxuu dhul siin karaa qof ka yar 15 sano wakiilna leh. Ama dhul kale oo degsiimo hore ku leh caasimadda.

## Qodobka 16-aad
## Dhulka Dhisme ee Mashaariicda Gaar ahaaneed

16.1 Cidii doonaysa dhul dhisme ay ku fuliso mashaariic gaar ahaaneed oo ka mid ah mashaariicda horumarinta dalka, sida:- warshadaha iwm wuxuu ka soo qaadanayaa ogolaansho waafaqsan tusmada mashruuceeda hay'ada ku shaqada leh arrinta uu khuseeyo mashruucu.

## Qodobka 17-aad
## Waajibaadka Qofka Dhulka La Siiyo

17.1 Qofka dhulka la siiyey waxaa laga doonayaa

A) In uu u isticmaalo dhulka ujeedadii loo siiyey oo keliya, haddii uusan ka helin D/hoose ee Garoowe fasax ujeedadii hore ka bedelaya.
B) In uu bixiyo qiimaha dhulka iyo wixii canshuur ah ee hadda jira ama kuwa ku soo bixi doona sharciga dambe.
C) In uu dhismaha waafajiyo jaangooyada guud iyo maabka u dagan xaafada wax laga dhisayo

17.2 Qofkii u hogaansami waaya nidaamka ku xusan lambarka 1aad ee qodobkan, waxaa lagala noqonayaa dhulkii hore loo siiyey, iyadoo aan loo celineyn wax magdhow ah, isla mar ahaantaasna waxaa laga duminayaa wixii dhisme ah oo aan loo ogolaan kharajkana isagaa la saarayaa.

## Qodobka 18-aad
## Joojinta Dhismaha

18.1 Markay jirto sabab sharciga waafaqsan D/hoose ee caasimadu waxay amri kartaa joojin dhisme muddo aan ka badnayn 3 bilood, mudada joojintu kuma xisaabsana mudada dhismaha ee qofka loo qabanayo.

18.2 Waxaa kale oo ay amri kartaa joojin dhisme la bilaabay ama socda, iyadoo sababtu ay tahay dib u habeynta degsiimada.

18.3 Qofka dhismaha loogaga joojiyey si sharciga waafaqsan ma sheegan karo wax xuquuq ah oo la xiriirta mudada joojinta.

**Qodobka 19-aad**
**(Mudada Siismada & Isticmaalka Dhulka)**

19.1 Mudada siismada dhulku waxay noqonaysaa sida soo socota:-

a) Siismadu waa u joogto muwaadinka P/land haddii uu fuliyo shuruudaha sharcigu dhigayo
b) Dadka ajnabiga ah mudada isticmaalku kama yaraan karto 10 sano kamana badnaan karto 50 sano, isla markaasna waa loo cusboonaysiin karaa marka ay mudadu ka dhamaato

Habka siismada dhulka laga baaro ama laga qoto macdanta, waxaa soo gudbinaya Golaha xukuumada waxaana ansixinaya Golaha Wakiillada DGPL

**Qodobka 20-aad**
**(Mudada Dhismaha)**

20.1 Dhulka leh isticmaal rasmi ah qofkii la siiyaa waa in uu dhismaha ku dhameeyaa mudo 2 sano gudaheed ah laga bilaabo maalinta uu qofku qaato warqada dhul siismada

20.2 Dhulka leh isticmaal ku meel gaar ah qofkii la siiyaa waa in uu dhismaha ku dhameeyaa muddo ah hal sano gudaheed laga bilaabo maalinta uu qofku qaato buleetada dhismaha

**Qodobka 21-aad**
**(Kordhinta Mudada Dhismaha)**

21.1 Qofka dhul la siiyey hadii ay la soo gudboonaato dhinbaato ka hor istaageysa in uu dhismihii ku fuliyo mudadii loo qabtay, D/hoose waxay u kordhin kartaa mudada dhismaha, iyadoo ugu daraysa mar kasta muda aan ka badnayn tii asalka ahayd

21.2 Kordhinta noocaas ahi ma dhaafi karto laba goor, wixii intaa ka badana waxay noqonaysaa kordhin aan caadi ahayn, waxaana awood u leh duqa Caasimaada

**Qodobka 22-aad**
**(Kicinta ama Duminta Dhismaha Sharci daro)**

22.1 Dhisme kasta oo aan loo soo marin habka dhul bixinta leh isticmaalka rasmiga ah iyo kan leh isticmaalka ku meel gaar ah waxaa loo aqoonsanyaa mid sharci daro ah

22.2 D/hoose ee Garoowe iyadoo fulinaysa jaangooyada guud waxay amri kartaa kicinta dhismooyinka sharci darada lagu taagay, ha haadeen dhismooyin kooban ama xaafadan, ka dib markii uu sidaas gudoonsado Guddiga joogtada ah ee Golaha shacbiga deegaanka

22.3 Kicinta dhismaha sharci daro waxay ku imaan kartaa labo sifaale:

A) Kicin xaafad dhan oo dhisme sharci daro ah, si loo baneeyo dhulka ay ku fadhido, waxayna dhacaysaa marka dhulka ay xaafadu haysato uu yahay mid soo gelaya ku tala galka jaangooyada, loona qorsheeyey arrimah ka duwan degsiimada caadiga ah.
B) Habeyn xaafad hore u ahayd sharci daro, taasoo la waafajinayo maab loo diyaariyey habeyntaas.

22.4 Dhismaha sharci darada ah ma noqon karo sabab lagu helo dhul, kicintiisuna magdhow kama dhalan karo, hase yeeshee D/hoose waxaa ay qofka laga dumiyey dhismaha sharci daro siin kartaa dhul kale ee uu dego, ka dib marka ay sugnaadaan arrimahan soo socda:-

A) Dhismaha sharci daro uu yahay mid lagu dhaqmay ugu yaraan 8 sano wakhtiga dhaqan galka sharcigan
B) In ujeedada loo taagay dhismaha sharci daro ayan ahayn dhul ku helid
C) Dhul bixinta ka dhalata duminta ama kicinta dhismooyinka kooban ama xaaafad dhan waxaa xaq u yeelanaya dadkii markii hore deganaa

22.5 Waxaa ka reeban D/hoose inay dhulkaas siiso dad kale inta ay joogaan dadkii laga dumiyey

## Qodobka 23-aad
## (La wareegid Dhul Dan Guud Darteed)

23.1 Golaha shacabka ee caasimaddu wuxuu awood u leeyahay in uu soo saaro Go'aan la wareegid dhul dhisan ama dhul banaan oo horey qof kale loo siiyey dan guud darteed

23.2 Qofka lagu soo saaray Go'aanka ku cad lambarka 1aad ee qodobkan wuxuu xaq u yeelanayaa waxyaabaha soo socda:-

A) Dhulka dhisan waxaa qofkii lahaa la siinayaa magdhow u dhigma waxaa ka dhisan goobta lagala wareegay, iyadoo isla mar ahaantaas la siinayo dhul kale oo u dhigma cabir ahaan.

23.3 Marka la bixinayo magdhow waxaa la tixgelinayaa in dhismuhu uu yahay mid waafaqsan shuruudaha sharciyeed ee u kala degsan dhulalka leh isticmaalka rasmiga ah ama ku meel gaarka ah

A. Dhismaha khilaafsan shuruudahaas waxaa loo aqoonsanayaa mid sharci daro ah, qofkiisu xaq u yeelan maayo wax magdhow ah.

23.4 Dhismaha loola wareegay dan guud awgeed, iyadoo la dhowrayo xubinta 4 aad ee qodobkan waxaa keliya oo loogu isticmaali karaa dan guud, waxaana reeban in dhismahaas loogu isticmaalo dan gaar ahaaneed.

## Qodobka 24-aad
## (Ganacsiga Dhulka Banaan)

24.1 Waxaa mamnuuc ah ganacsiga dhulka bannaan, ha ahaado mid leh isticmaal rasmi ah ama mid leh isticmaal ku meel gaar ah, qofkii dhul la siiyana ma beecin karo, dhulkana waa inuu isticmaalo ujeeddadii loo siiyey.
24.2 Haddii qofka la siiyey dhulka uusan ku dhisi karin muddada ku xaddidan sharcigan wuxuu dhulkii u soo celin karaa D/hoose ee Garoowe, isagoo keenaya warqadihii dhul bixinta.

wuxuuna xaq u yeelanayaa in loo celiyo qiimihii dhulka.

**Qodobka 25-aad**
**Wareejinta Baraatikada Dhul leh Isticmaal Rasmiga ah**

25.1 Diiwaanada warqadaha kale iyo maababka la xiriira dhulka leh isticmaalka rasmiga ah ee ku yaal magaalo madaxda Garoowe, horeyna ay u maamuli jirtay Wasaaradda Hawlaha Guud waxaa lagu wareejinayaa Dawladda hoose ee caasimadda, waa inaanay wareejintaasi ka hor imaaneyn sharcigii dhulka hore loogu ansixiyey Wasaaradda Hawlaha Guud

**Qodobka 26-aad**
**Dhulkii Hore Loo Bixiyey**

26.1 Dhulkii leh isticmaalka rasmiga ah oo ay Wasaaradda Hawlaha Guud horey u bixisay ama Baraatikada siismadu socoto, waxay Dawlada hoose ee Garoowe ku wadaysaa habkii maamulka dhulka, iyadoo la waafajinayno qaanuunkii hore ee dhulka ee loo ansixiyey Wasaarada Hawlaha Guud X/lambar________?

**Qodobka 27-aad**
**(Ka dhimid qiimaha dhulka mashaariicda danta guud ku jirta)**

27.1 Duqa Mgaalada Garoowe, isagoo la tashaday Guddiga joogtada ah, wuxuu awood u leeyahay in uu qiimaha dhulka ka dhismo ama ka dhaafo qofkii dhisaaya mashruuc ah dhismo gaar ahaaneed oo ay ku jirto dan guud.

**Qodobka 28-aad**
**(Naadada Dhulka leh Isticmaal rasmi ah)**

28.1 Marka la bixinayo dhul leh isticmaal rasmi ah, waxaa la sameynayaa naado oo lagu soo saarayo wargeyska iyo faafinta rasmiga ah ee Dawlada, laguna dhejinayo meelaha caamka ah

28.2 Cidii dood ama hor istaagid ka qabta bixinta dhulkaas waxay la soo xiriireysaa qeybta magaalaynta iyo dhulka D/hoose ee Garoowe, muddo ku siman 30 (Soddon) maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo saaro faafinta rasmiga ah.

**Qodobka 29-aad**
**(Guddoonka Dhul Bixinta)**

29.1 Guddoonka dhul bixinta oo leh isticmaal rasmiga ah waxaa lagu soo saarayaa amarka Duqa Magaalad, ka dib marka uu sidaas Guddoonsadto Guddiga joogtada ah ee Golaha Shacbiga ee Magaalada Garoowe.

29.2 Duqa Magaalada Caasimadda wuxuu awooda dhul bixinta leh isticmaal ku meel gaar ah u wakiilan karaa Guddi qaabilsan dhul bixinta oo uu isagu magacaabo.

**Qodobka 30-aad**
**(Guddiga Farsamada)**

30.1 Dawlada hoose waxay yeelanaysaa Guddi farsamo oo joogta ah oo ka talisa jaangoovada guud, naqshadaha dhismaha iyo wixii arrin ah oo la xiriira dhulka degsiimada.

30.2 Guddiga farsamada wuxuu ka kooban yahay aqoon-yahano, farsamo-yaqaano sare iyo saraakiil caafimaad oo ka kala socda D/hoose ee Garoowe, Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Hay'adihii kale ee la garto.

30.3 Dhismaha Guddiga iyo habka ay u shaqeynayaan waxaa lagu soo saarayaa Xeer-nidaamiye

**Qodobka 31-aad**
**(Ganaax)**

31.1 Qof kasta oo ku xad gudba sharcigan waxaa la ganaaxayaa Sh.So.500,000 (shan boqol oo kun) ilaa 5,000,000 (shan milyan) hadii uusan falkiisu keenayn dembi ka weyn, kaasoo loo gudbinayo hay'adaha sharciga qaabilsan.

31.2 Mas'uuliyiinta loo xilsaaray dhul bixinta ee ku xadgudba qodobada **10,11,12,13,14,15,18,20, iyo 23**, ee sharcigan waxaa lagu ganaaxayaa xarig gaaraya ilaa 5 sano iyo lacag dhan Sh So 10,000,000 (toban milyan) haddii aan arrintani keenayn fal dambiyeed ka weyn, kaasoo loo gudbinayo hay'adaha sharciga qaabilsan iyo inay Dawladda u celinayaan wixii khasaaro ah ama magdhow ah oo ka dhasha xad-gudubkaas.

**Qodobka 32-aad**
**(Soo saarid Xeer nidaamiye)**

32.1 Golaha Shacabka ee caasimaddu, wuxuu awood u leeyahay in uu soo saaro xeer-nidaamiye lagu dhaqan gelinayo sharicgan

**Qodobka 33-aad**
**(Awood Siin)**

33.1 Wasiirka Wasaaradda Dawladaha hoose iyo Horumarinta Miyiga, isagoo la tashaday Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud, wuxuu talo ku soo jeedin karaa in lagu wareejiyo maamulka dhulka dhismaha, labadiisa noocba, degmadii loo arko in ay hanan karto. awood iyo aqoon ahaanba xilkaas.

33.2 Oggolaanshaha wareejinta maamulka dhul bixinta ee ku cad lambarka 1aad ee qodobkan waxaa lagu soo saarayaa Xeer Madaxweyne.

**Qodobka 34-aad**
**Dhaqan-gal Sharci**

34.1 Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa markii Golaha Wakiilladu oggolaado, Madaxweynuhuna saxiixo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda

34.2 Sharcigani wuxuu ka mid noqonayaa shuruucda Dawlad Goboleedka Puntland waxaana lagu maamulayaa Caasimadda DGPL ee Garoowe.

**Wabillaahi Towfiiq**

**Maxamuud Muuse Xirsi**
**Madaxweynaha Dawlada Puntland**

Garoowe

# LIFAAQ

## QEYBTA 1-AAD
## WAXYAALAHA AY CAASIMADU KAGA DUWAN TAHAY XARUMADA GOBOLLADA KALE EE DGPL

### Qodobka 1-aad
### Sohdimadaha Ama Halka ay ku taalo Caasimaddu

1.1 Caasimadu waxay ku taalaa Gobolka Nugaal degmadiisa Garoowe, waxayna xuduudo la leedahay Gobollada ama Degmooyinka kala ah
B) koonfur waxaa ka xiga degmada Eyl
T) Waqooyi waxaa ka xiga Gobolaka Sool
J) Bari waxaa ka xiga Degmada Dan-gorayo
X) Galbeed waxaa ka xiga Degmada Buurtinle

### Qodobka 2-aad
### Dhinaca Maamulka

2.1 Caasimadu waxay leedahay maamul u qeybsan heer degmo oo Gole sharci dejin iyo fulneedba leh, waxay kaloo caasimaddu leedahay maamul heer Gobol ah oo hawlihiisa u Madax bannaan

2.2 Caasimadu waxay xarun u tahay DGPL sida:- Wasaaradaha, Wakaaladaha & Hay'adaha Dawlada oo dhan, waxaa iyana dhamaan xafiisyo ku yeelanaya Hay'adaha Ajnabiga ah & Ngo-da Dawliga ah

### Qodobka 4-aad
### Shuruucda lagu dhaqayo Caasimadda P/land

4.1 Caasimadda waxaa lagu dhaqayaa Dastuurka DGPL iyo xeer-nidaamiyayaasha ay Golaha deegaanku ansixiyaan

4.2 wax ka bedelka shuruucda Caasimadda, waxaa soo jeedinayaa Golaha deegaanka ee degmada, waxayna u soo gudbinayaan Golaha Xukuumadda, waxaana ansixinaya Golaha Wakiillada ee DGPL

### Qodobka 5-aad
### Xiliga la gaaro Doorasho Xor ah

5.1 Marka la gaaro doorasho xor ah dhamaan muwaadiniinta P/land waa u siman yihiin musharax-nimada kuraasta ama xubnaha Golaha deegaanka ee degmada Caasimadda

5.2 Maamulka Gobolka ee Caasimadda, sidoo kale waxaa loo magacaabi karaa muweaadin kasta oo reer P/land ah oo xilkaas qaban kara

## QEYBTA 2-AAD
## WAAJIBAADKA KA SAARAN HAY'ADAHA DAWLIGA AH CAASIMADDA

### Qodobka 1-aad
### Wasaaradda Xanaanada Xoolaha Dhirta & Daaqa

1.1 Beerta dhirta lagu kobciyo
1.2 Beerta wadaniga ah (sida beerta xoriyada)
1.3 Beerta Xayawaanka lagu xanaaneeyo waxaana loo xadidayaa dhul ku haboon

**Qodobka 2-aad**
**Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha**

2.1 Waxay Caasimadda ka sameynaysaa, iyadoo kala tashanaysa Golaha Deegaanka halka ku haboon Warshadaha & Goob ku fiican carwada qaranka ee P/land

**Qodobka 3-aad**
**Wasaaradda Hawlaha Guud & Gaadiidka**

3.1 Waxay Caasimaddu ka sameynaysaa Garoomo Diyaaradeed oo caalami ah
3.2 Wadooyinka Magaaladda

**Qododbka 4-aad**
**Wasaaradda Warfaafinta Hidaha & Dhaqanka**

Waxaa laga rabaa inay Caasimadda ka sameyso:-
4.1 Idaacada qaran,
4.2 Madbacad qaran
4.3 Guriga Hidaha iyo Dhaqanka
4.4 Rugta cilmi baarista DGPL

**Qodobka 5-aad**
**Wasaaradda Awqaafta & Arrimaha Diinta**

Waxaa laga rabaa inay Caasimadda ka sameyso: -

5.1 Inay noolayso shacaairta Islaamiga ah oo dhan, korna u qaado Bilicsamida Masaajidada Caasimadda
5.2 Waa in ay sameysaa Maktab Islaami ah si kor loogu qaado Barashadda Diinta Islaamka,

**Qodobka 6-aad**
**Wasaaradda Isboortiga & Dhalinyaradda**

Waxay sameynaysaa :-

6.1 Caasimadda waxaa laga sameynayaa Garoomo ciyaareed oo heer qaran ah.
6.2 Waxaa Caasimadda laga abuurayaa kooxo waaweyn oo ciyaartow ah oo matali kara kuna ciyaari kara magaca P/land
6.3 Waxaa caasimadda laga sameynayaa xarumo dhalinyaradda wax lagu baro garaadkooda aqooneedna kor loogu qaado

**Wabillaahi Towfiiq**

**Guddiga Soo Habeynta Lifaaqa Xeerka Caasimadda:-**

| | | |
|---|---|---|
| 1 | Xildhibaan Xuseen maxamed Cigaal | Gudoomiye |
| 2 | " " " Maxamuud Maxamed Idiris | K/xigeen |
| 3 | " " " Bashiir C/llaahi Nuur | " " |
| 4 | " " " C/raxmaan Cali Bulshaale | " " |
| 5 | " " " Warsame Seeraar Xuseen | " " |

**Gen:- Maxamuud Muuse Xirsi**
**Madaxweynaha Dawlada Puntland**